180 Park Avenue, Portland, ME 04102 | P. (207) 874-2141 | F. (207) 874-2164 | GREATERPORTLANDHEALTH.ORG

GREATER PORTLAND HEALTH
CARING FOR THE WHOLE COMMUNITY

# Xogta Diiwaan Gelinta Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga

Waalidka/Masuulka Qaaliga ah,

Ayada oo kaashanaysa Portland, Westbrook iyo South Portland Public Schools iyo Maine Medical Center, Greater Portland Health (GPH) waxay bixisaa adeegyada xarunta caafimaadka ee dugsiga ee: Dugsiyada sare ee Portland, Deering, iyo Casco Bay, PATHS, Dugsiga Dhexe ee King, dugsiyada dhexe iyo sare ee Westbrook, iyo dugsiyada dhexe iyo sare ee South Portland.

Fadlan buuxi foomka diiwaan gelinta caafimaadka ee lifaaqa ku jira si aad ugu ogolaato ilmahaaga inuu helo adeegyada caafimaadka ee dugsiga lagu baxsho ee midkood Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga ee GPH oo lagu bixinaayo midkood adeegga daryeelka aasaasiga ah ee GPH ee u adeegga carruurta. **Haddii ilmahaaga horey looga diiwaan galshay bixiyaha daryeelka aasaasiga ah oo joogto ah ama bixiyaha caafimaadka dhimirka, waxaad wali ka diiwaan gelin kartaa barnaamijka Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga ee GPH.** Yoolkeenu waa in dhammaan carruurta iyo xarumahooda lagu xiro xarunta caafimaadka daryeelka aasaasiga ah. Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga ee GPH waxay kaabaan adeegyada dhakhtarka daryeelka joogtada ah ee ilmahaaga waxayna isku dubaridaan daryeelka xarumahaas sida haboon. Fadlan booqo webseedka GPH (http://www.greaterportlandhealth.org/) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Sheegashooyinka caymiska ayaa loo gudbin doonaa adeegyada la baxshay marka ay qusayso. Haddii bukaanku uusan haysan caymis, Greater Portland Health ayaa bixisa adeegga qiimaha dabacsan.

| **Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga ee Greater Portland Health waxay bixiyaan:** | **5-ta sababood ee ugu badan ee aad u diiwaan gelinayso ilmahaaga:** |
|---|---|
| • Adeegyada Caafimaadka ee Aasaasiga ah<br>• Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka<br>• Adeegyada Dhimirka<br>• Adeegyada Caafimaadka Ilkaha (diiwaan gelin gaar ah)<br>• Adeegyada Caafimaadka Lagu bixiyo Khadka<br>• Maareynta Kahortaga Uurka, ayna ku jirto kahortaga uurka ee degdega ah<br>• Dhiig qaadista | 1. Shaqaale saaxiibtinimo leh, oo daryeel badan<br>2. Jadwal raaxo leh, oo degdeg ah (looma baahna in aad gaadiid raacdo)<br>3. Wada shaqeyn lala sameynaayo dhakhtarka guud ee ilmahaaga<br>4. Daryeelka tayada badan ee naxariista leh<br>5. Kormeerka fudud ee xanuunnada dabo dheeraaday |

**Gudaha baakada waxaad ka helaysaa:**

- Foomka Diiwaan Gelinta Caafimaadka – **fadlan buuxi, saxiix oo ku celi xarunta caafimaadka dugsiga ama kalkaalisada dugsiga haddii ilmahaaga la diiwaan galiyay sanadkii lasoo dhaafay maadaama foomamkeenu isbadeleen oo xog cusub loo baahan yahay**
- Ogolaanshaha Shaacinta Xogta – **Fadlan saxiix oo ku celi xarunta caafimaadka ee dugsiga ama kalkaalisada dugsiga xataa haddii ilmahaaga la diiwaan galshay sanadkii hore**
- Ablikeeshinka Fariin Qoralka ee TigerConnect – **fadlan saxiix oo ku celi xarunta caafimaadka dugsiga ama kalkaalisada dugsiga xataa haddii ilmahaagu ka diiwaan gashanaa yahay adeegsiga ablikeeshinkaan fariin qoraalka sanadkii hore**
- Ogeysiiska Farsamooyinka Xogta Caafimaadka ee Greater Portland Health – oo ku qoran dhabarka danbe ee warqadaan – *si aad u haysato*

- Su'aalaha Badanaa la Isweydiiyo (FAQ) ee ku saabsan Xarumaha Caafimaadka Dugsiga ee GPH – *si aad u haysato*

*Wixii su'aalo dheeraad ah, fadlan kala xiriir US lambarka (207) 874-2141 X 8402 ama iimeylka gphschoolhealh@greaterportlandhealth.org*

GREATER PORTLAND HEALTH
CARING FOR THE WHOLE COMMUNITY

# OGEYSIISKA FARSAMOOYINKA XOGTA CAAFIMAADKA

**Ogeysiiskaan wuxuu qeexayaa sida xogtaada caafimaadka loo adeegsan karo loona shaacin karo iyo sida aad ku heli karto xogta.**

## Fahanka xogtaada/diiwaankaaga caafimaadka

Marka aad booqato Greater Portland Health, diiwaanka booqashada ayaa la qori doonaa. Diiwaankaan waxaa ku qornaan kara astaamaha, baaritaanka iyo natiijooyinka baaritaanka, xanuunka, daawaynta, iyo qorshaha daryeelkaaga/adeegyadaada mustaqbalka. Xogtaan oo la yiraahdo diiwaankaaga caafimaadka ayaa qayb muhiim ah ka ah daryeelka/adeegyada caafimaadka ee aan ku siinayno. Waxay noqonaysaa:

- Aasaaska qorsheynta daryeelkaaga iyo daaweyntaada.
- Qaababka aan kula xiriirayno xirfadleyaasha caafimaadka ee doorka ku leh daryeelkaaga.
- Dukumiinti sharci oo qeexaaya daryeelka/adeegyada aad hesho.
- U xaqiijinta lacag bixiyaasha dhinaca sadexaad (shirkadda caymiska) in adeegyada la baxshay.

## Xuquuqdaada Quseeya Xogtaada Caafimaadka

Inkasta oo diiwaankaaga caafimaadku uu yahay hantida muuqata ee Greater Portland Health, haddana xogta adiga ayaa iska leh. Sida ku Cad Xeerarka Asturnaanta ee Federaalka, waxaad xaq u leedahay:

- Inaad hesho ogeysiiska adeegsiga iyo shaacinta diiwaankaaga caafimaadka/daryeelka, ayna ku jirto nuqulka warqadda ah ee ogeysiiska haddii aad codsato.
- Inaad codsan karto in xadidaado la saaro adeegsiga iyo shaacinta xogtaada caafimaadka, ama in aad naga codsato in aan xiriiradaada qarsoodiga ah kuugu soo gudbino qaabab gaar ah.
- In aad kormeerto oo aad hesho nuqulka diiwaankaaga.
- In aad codsato in diiwaankaaga wax laga badelo.

## Waajibaadkeena

Greater Portland Health waxaa laga doonayaa inay:

- Ilaaliso sirta xogtaada caafimaadka.
- Inay ku siiso ogeysiiska qeexaaya masuuliyadaha iyo xeerarka asturnaanta ee sharciga ee Greater Portland Health ee quseeya xogta caafimaadka ee aan uruurino aana hayno ee kugu saabsan.
- Inay ku dhaqanto shuruudaha ogeysiiskaan
- Inay hesho ogolaanshahaaga kahor inta aysan shaacin xogtaada caafimaadka.

Greater Portland Health waxay xaq u leedahay inay badesho oo saxdo xeerarkeeda sirta si ay ugu dhaqanto sharciyada Federaalka iyo Gobalka. Haddii tan loo baahdo bukaannada/macaamiisha ayaa heli doona **Ogeysiiska farsamooyinka Xogta Caafimaadka ee cusub** booqashada xigta ee ay ku yimaadaan.

## Shaacinnada La Ogolaaday ayadoo aan Ogolaansho la Helin loona Adeegsado Ujeedooyinka Danaha Qaranka

Greater Portland Health waxa aloo ogol yahay inay adeegsato oo shaaciso xogtaada caafimaadka ayadoo aan haysan ogolaanshahaaga marka:

- Uu ka doonaayo sharciga federaalka ama gobalku.
- Loo diraayo maamullada, ayna ku jiraan saraakiisha caafimaadka ee gobalka, Maamulka Cuntada iyo Daawada, booliiska, ururada uruuriya xubnaha jirka, baareyaasha caafimaadka, marka ay qusayso magdhawga shaqaalaha, marka loo codsado hawlaha gaarka ah ee shaqada dawlada, ayna ku jiraan xaaladaha milatariga iyo kuwa lamidka ah iyo wakaaladaha kale ee masuulka ka ah kahortaga iyo xakamaynta cudurka.

## Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan

Greater Portland Health waxay xubin ka tahay Community Care Partnership of Maine (“CCPM”), oo ah "Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan" oo diirada saaraaya hormarinta caafimaadka bulshooyinka uu u adeego. Xubnaha CCPM, oo kaashanaaya shirkadaha caymiska, ayaa adeegsada qiimeynada caafimaadka dadwaynaha, dib u eegista adeegsiga, qiimeynta tayada iyo hawlaha hormarinta, iyo xeeladaha kale ee cadeynta ku saleysan si kor logu qaado caafimaadkaaga. Xubnaha ayaa si guud masuul uga ah caafimaadka dhammaan bukaanka ay u adeegto CCPM. Ururada xubnaha ka ah Qorshahaan Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan waxaa kamid ah xarumaha soo socda ee caafimaadka dadwaynaha iyo isbitaallada: Cary Medical Center, DFD Russell Medical Center, Fish River Rural Health, Katahdin Valley Health Center, Mayo Regional Hospital, Millinocket Regional Hospital, Nasson Health Care, Pines Health Services, Penobscot Community Health Center, Greater Portland Health, Sebasticook Family Doctors, iyo St. Joseph Healthcare. CCPM s Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan ayaa u ogolaanaaya ururadaan kala duwan, ayna ku jirto Greater Portland Health, in ay isla wadaagaan xogta PHI marka loo baahdo si loo fuliyo daawaynta la ogol yahay, hawlaha lacag bixinta ama daryeelka caafimaadka ee quseeya shaqada Qorshaha Daryeelka Caafimaadka ee Abaabulan, ilaa in uu si kale u xadido maahee sharcigu, xeerku ama qaanuunku. Liiska wakaaladaha ayaa wax laga badeli karaa si loogu daro wakaalado cusub mustaqbalka. Waxaad ka helaysaa liiskii ugu danbeeyay barta www.ccpmmaine.org/members ama wac 207-992-9200.

## Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, Si aad u Codsato xog ama si aad u Soo Sheegto Cilad

Haddii aad qabto wax su’aalo ah, waxaad kala xidhiidhi kartaa Greater Portland Health cinwaanka 180 Park Avenue, Portland, ME 04102, lambarka taleefanka (207) 874-2141, ama mareegta www.greaterportlandhealth.org. Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada asturnaanta lagu xadgudbay, waxaad cabasho u gudbin kartaa Sarkaalka Asturnaanta iyo Badqaba adigoo u gudbinaya cinwaankaas kore, ama Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Washington, D.C. Ma jiri doonto wax ciqaab ah ama aargudasho oo ka dhalan karta cabasho soo gudbinta

# Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee GPH
# Foomka Diiwaan gelinta
## Fadlan buuxi oo ku celi dugsiga

Magaca Dugsiga: ________________________ Heerka Fasalka Dugsiga: ______________

Magaca Ilmaha (Magaca dambe, Magaca hore, iyo Xarafka koowaad ee magaca dhexe):______________ Taariikhda Dhalashada: ___ / ___ / ___ Jinsiga Sharci ahaan (goobaab mid): Lab Dheddig Bisha / Maalinta / Sannadka

(Sida uu ugu qoran yahay kaarka MaineCare, haddii uu khuseeyo)

Ciwaanka ________________________ Koodhka Boostada ______________ Bilaa Hooy ☐

Taleefanka Waalidka ______________Fariin Codeed, ma ogoshahay? Haa ama Maya
Ciwaanka iimeylka ilmaha ee Caafimaadka lagu baxsho khadka Oonlaynka______________

Magaca Caymiska ______________ Lambarka Aqoonsiga Caymiska ______________

Lambarka Kooxda__________ Ciwaanka Shirkadda Caymiska______________

Magaca Damiinka/Waalidka: ______________ Lambarka Taleefanka __________

Lambarka Aqoonsiga MaineCare (wuxuu Ku dhamaadaa A) ______________

**Ma tahay Bilaa Caymis: Haa / Maya**

Haddii aad tahay bilaa caymis, midkood la taliyaasheena *kaalmada* dhaqaalaha *ayaa kula soo xiriiri doona* si uu kaagala hadlo caymiska iyo dookhyadeena adeegga qiimaha jaban.

**Xogta Caafimaadka:**

Dakhtarka Guud/Bixiyaha Daryeelka Asaasiga ah: ______________________

Ilmahaygu wuxuu maray baaritaanka jirka labadii sano ee lasoo dhaafay gudahood.
__________ HAA __________ MAYA ______________ Ma hubo

Ilmahaygu wuxuu u baahan doonaa talaallada sanadkaan. ______________ HAA ______ MAYA _____ Ma hubo

Ilmahaagu ma qabaa xanuunka Neefta? Haa/maya

Qorshaha Qoran ee Xanuunka Neefta ee Dugsiga yaala? HAA/MAYA

Ilmahaagu ma qabaa xanuunka Macaanka? Haa/may Qorshaha Qoran ee Xanuunka Macaanka ee dugsiga? HAA/MAYA

Ciladaha kale ee caafimaadka Jidhka, ilkaha ama dhimirka: ______________________

**Taariikhda Caafimaadka Qofka/Qoyska**– Fadlan eeg Taariikhda Qoyska ee midkood xanuunnada soo socda:

_____Xasaasiyaadka _____Xanuunka Macaanka
_____Xanuunka difaaca jidhka _____Xanuunka Neefta
_____Cudurka wadnaha _____Xanuunka Dhimirka
_____Khamrada/Maandooriyaha ____Dhiigkarka
_____Kalastarool sareeya _____Qaaxada

Isirka Ilmaha (tig saar mid ama ka badan): ________Cadaan ________Madoow, Afrikaan, Madoowga Mareykanka ________U dhashay Jasiiradaha Pacific-ga ee Kale ________Aasiyaan
________Dhaladka Hindida Koonfurta/bartamaha/Waqooyiga Ameerika ________Hawai Dhalad ah ________Isiro badan leh

Qoomiyadda: ___Hispanic/Latino ______________Aan ahayn Hispanic/Latino

Dakhliga Guud ee Sanadkii soo gala Qoyska: __________ Wadarta guud ee xubnaha qoyska ee ku nool guriga: ______________

Magaca Damiinka (qofka masuulka ka ah biilasha caafimaadka ee ilmaha): ______________Xiriirka Kala Dhexeeya Ilmaha: ____________

Marka aan saxiixo foomkaan, waxaan qirayaa aana fahmayaa in:

- Aan helay aana akhriyay Warqadda Xogta ee Xarunta Caafimaadka Dugsiga ee Greater Portland Health's ("GPH"), taas oo sharxaysa waxa ay yihiin Xarumaha Caafimaadka Dugsiga ee GPH iyo noocyada adeegyada iyo dheefaha ay siin karaan ilmahayga.
- Xarumaha Caafimaadka Dugsiga ee GPH waa wakaalad ka madax banaan xafiisyada dugsiyada iyo kalkaalisooyinka dugsiga. Waxay bixiyaan qiimeynada daryeelka aasaasiga ah iyo heerarka kala duwan ee daawaynta caafimaadka ee goobaha dugsiga ayagoo haddana la xiriiraaya bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ee sidoo kale door ku yeelan kara daryeelka ilmahayga.
- Ogolaanshahaan ayaa shaqeynaaya mudada ilmahaygu ka diiwaan gashan yahay nidaamyada dugsiyada soo socda: Portland, Westbrook, ama South Portland, ilaa aan xili hore qaab qoraal ah uga nodo maahee ogolaanshaha.
- Waxaa la iga doonayaa in aan akhriyo oo saxiixo Foomka Ogolaanshaha ee Adeegsiga iyo Shaacinta Xogta Daryeelka Caafimaadka ee quseeya diiwaan gelinta ilmahayga ee Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Dugsiga ee GPH.

Waan akhriyay foomkaan si buuxda waxaana aqbalayaa in aan ilmahayga ka diiwaan galsho Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Dugsiga ee GPH wakhti xaadirkaan.

✍ **Saxiixa Waalidka/Masuulka:** ______________________________ Taariikhda:______________

Magaca Farta Waawayn ku qoran: ______________________________ Xiriirka______________________

**Xarumaha Caafimaadka Dugsiyada ee Greater Portland Health**

**Oggolaansho Shaacinta Macluumaadka**

**Marka aan hoos saxiixo, waxaan qirayaa aana aqbalayaa waxyaabaha soo socda, ee quseeya ka diiwaan gelinta ilmahayga Barnaamijka Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Dugsiga (SBHC) ee Greater Portland Health (GPH) iyo shaacinta diiwaanka caafimaadka iyo xogta la xiriirta ee ilmahayga:**

- Waan helay waana akhriyay Ogeysiiska Xeerarka Sirta ee GPH kaas oo sharxaaya arimaha quseeya adeegsiyada iyo shaacinnada lagu sameyn karo xogta caafimaadka ee diiwaanka caafimaadka ilmahayga, sida ku cad heerarka qarsoodiga ee sharciga HIPAA.

- Waxaan u ogolaanayaa xarumaha GPH SBHC inay helaan diiwaanka caafimaadka dugsiga ee ilmahayga, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna diiwaannada caafimaadka jirka, dhimirka iyo tallo bixinta, hadday jiraan, iyo xog kasta oo la xiriirta, si loogu adeegsado daawaynta ama sida kale ee uu amraayo ama ogolyahay sharcigu sida ay go'aamiso GPH SBHC.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay siiso Dugsiga (ayna ku jirto kalkaalisada iyo shaqaalaha bulshada) xogta ka timid diiwaannada GPH SBHC sida muhiimka u ah ee ku haboon daawaynta ama sida kale ee uu amraayo ama ogol yahay sharcigu sida ay go'aamiso GPH.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay xogta ku jirta diiwaannada GPH SBHC (ayna ku jirto diiwaannada caafimaadka haddii ay ku jiraan diiwaanka GPH SBHC) la wadaagto dhakhaatiirta kale iyo bixiyaasha daawaynaaya oo ay ku jiraan dhakhaatiirta aasaasiga ah, dhakhaatiirta ilkaha, iyo xirfadleyaasha caafimaadka dhimirka, si loo fududeeyo bixinta daryeelka caafimaadka ee ilmahayga.

- Waxaan u fasaxayaa dhakhtarka aasaasiga ah ee ilmahayga, dhakhtarka ilkaha, iyo xirfadlaha caafimaadka dhimirka ("Dhakhaatiirta Dhinaca Sadexad") in ay xogta iyo diiwaannada caafimaadka siiyaan GPH SBHC si loo fududeeyo bixinta daryeelka caafimaadka ee ay siinayso GPH SBHC ilmahayga. Waxaan fahmayaa in ay Dhakhaatiirtaas Dhinaca Sadexaad iga codsan karaa in aan fuliyo ogolaansho kale oo u sahlaaya shaacinta diiwaannada quseeya daawaynta ay bixiyaan Dhakhaatiirta Dhinaca Sadexaad.

- Waxaan u fasaxayaa GPH SBHC inay shaaciso xogta ka timid diiwaannada marka loogu baahdo qarash ka dalbashada shirkadaha caymiska ama qarash bixiyaasha kale.

- Waxaan fahmayaa oo aqbalayaa in: (i) Ogolaanshahaan uu shaqeynaayo laga bilaabo taariikhda saxiixa ilaa in muddo intaas ka gaaban halkaan lagu baxsho; (ii) In aan ka laaban karo ogolaanshaha wakhtiga aan doono aniga oo soo gudbinaaya ogeysiiska qoran ee ka laabashada ogolaanshaha, marka laga reebo marka ay GPH SBHC cuskatay ogolaanshihii hore.

✍ **Saxiixa Waalidka/Masuulka:**_______________________________________________ Taariikhda:______________

Magaca Farta Waawayn ku qoran: ________________________________________ Xiriirka______________________

**Su'aalaha Badanaa la Iska Waydiiyo Xarumaha Caafimaadka**

**Dugsiga ee Greater Portland Health**

**Su'aal: Waa kuwee dugsiyada leh xarumaha caafimaadka?**
**Jawaab: Gudaha Portland:** Dugsiga Dhexe ee King, Dugsiga Sare ee Deering, Dugsiga Sare ee Portland, Dugsiga Sare ee Casco Bay iyo PATHS
**Gudaha Westbrook**: Dugsiga Dhexe iyo Sare ee Westbrook
**Gudaha South Portland:** Dugsiga Sare ee South Portland and Middles.

**Su'aal: Sidee ayaan u diiwaan gelinayaa ilmahayga?**
**Jawaab:** Buuxi oo saxiix foomka diiwaan gelinta. Foomka la buuxshay ayaa lagu celin karaa qaababka soo socda: lagu celiyo xarunta caafimaadka ee dugsiga (SBHC), kalkaalisada dugsiga ama macalinka fasalka.

**Su'aal: Ilmahayga muu eegi karaa dhakhtarka caafimaadka ee Greater Portland Health (GPH) SBHC ama adeegga daryeelka aasaasiga ah haddii foomka diiwaan gelinta oo waalidku saxiixay aan la soo celin?**
Jawaab: Ilmaha yaryar (ka yar 18 sano jir*) waa in ay haystaan foomka diiwaan gelinta oo saxiixan kahor inta uusan qaabilin dhakhtar. Foomka diiwaan gelinta ayaa ah cadeynta ogolaanshaha si loo baxsho adeegyada caafimaadka iyo daryeelka dhimirka ee ilmaha.

Ogolaanshaha hadalka ee waalidka ama masuulka ilmaha ayaa u sahlaaya bixiyaha inuu qaabilo ilmaha **halmar keliya**. Foomka diiwaan gelinta oo la buuxshay oo saxiixan ayaa u baahan in la soo celiyo kahor inta aan wax adeegyo ah la bixin.

*Ilmaha aan qaan gaarin ayaa bixin kara ogolaanshaha dhammaan adeegyada caafimaadka, dhimirka, ilkaha iyo tallo bixinta kale ee caafimaadka haddii ilmaha aan qaan gaarin uu:

- Ku nool yahay meel gaar ah oo ka madax banaan yahay taageerada waalidka
- Xaas leeyahay
- Uu xubin ka yahay Ciidanka qalabka Sida
- Uu awood u leeyahay

Haddii ardaygu ka wayn yahay 18 sano jir, wuu buuxin karaa oo saxiixi karaa foomkiisa diiwaan gelinta si uu uga helo adeegyada adeeg kasta ama xarunta GPH.

**Su'aal: Maxaa u qalma booqasho qarsoodi ah?**
Carruurta ka diiwaan gashan SBHC ayaa heli doona adeegyada qarsoodiga ah (ilaa in ilmuhu doorto maahee in uu waalidkiis ka qaybgeliyo daryeelkiisa uuna bixiyo ogolaansho arintaas lagu sameynaayo). Adeegyada soo socda ayaa loo arkaa booqashooyin sir ah:

- Khamrada iyo adeegsiga daroogada iyo maandooriyaha
- Baaritaannada iyo daawaynta HIV iyo cudurada kale ee galmada la iskugu gudbiyo
- Adeegyada daryeelka hooyada iyo dhallaanka
- Daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaan socodka
- Maareynta xakamaynta uurka (ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna: kondhomyada, kaniiniyada kahortaga uurka ee afka laga qaato, jaamanka kahortaga uurka, kaniiniyada kahortaga uurka ee xaalada degdega ah; <u>ee ardayda dugsiga sare</u>: cirbadaha kahortaga uurka, talaalka kahortaga uurka, iyo aaladaha kahortaga uurka ee murqaha la gasho ayaa sidoo kale la heli karaa)

**Su'aasha: Miyaan u baahan nahay in aan diiwaan gasho ilmahayga haddii uu horey bukaan uga ahaa GPH?**
**Jawaab:** Haa

**Su'aasha: Ilmaha ma lagu qaabili karaa SBHC haddii aysan haysan wax caymis ah?**
**Jawaab:** Haa

**Su'aasha: Ma la iga dalban doonaa qarashka haddii qoyskaygu uusan haysan caymis?**
**Jawaab:** Haddii aadan haysan caymis, la taliyaha dhaqaalaha ee GPH ayaa kula soo xiriiri doona si laguugu qabto wakhti dib loogu eegaayo dookhyadeena qiimaha jaban si aad u hesho dalabka qarashka.

**Su'aasha: Maxaad ugu codsanaysaan xogta dakhliga qoyska foomka diiwaan gelinta? Ma diidi karaa in aan ka jawaabo su'aashaan?**
**Jawaab:** GPH ayaa looga baahan yahay inay soo sheegto heerarka dakhliga ee bukaanadeena si loo helo maal gelinta xarumaheena caafimaadku helaan.
Xogta gaarka ah ee bukaanka ayaa la wadaagi doonin, heerka dakhliga ee ilmaha ayaana sinaba u saameyn doonin daryeelka ay helaan. Waad diidi kartaa in aad bixiso xogta dakhliga.

**Su'aasha: Waa maxay farqiga u dhexeeya doorarka kalkaalisada dugsiga iyo tan SBHCs?**
**Jawaab:** Kalkaalisada dugsiga ayaa qiimeynaysa xaaladaha caafimaadka si loo go'aansho haddii ilmuhu u baahan yahay inuu qaabilo dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah. Kalkalaisooyinka dugsiga ayaa sidoo kale baari kara caqabadaha dhanka waxbarashada, dib u eegista xaalada talaalka, daryeelka ama daawaynta shilalka iyo xanuunnada, siiyaan daawooyinka oo ay taageeraan guusha waxbarashada ayadoo la adeegsanaayo IEP iyo IHPs.

SBHCs ayaa bixisa goobta xarunta iyo isha daryeelka aasaasiga ah ee carruurta waxaana ka shaqeeya dhakhaatiirta iyo khubarada caafimaadka dhimirka (tusaale, dhakhaatiirta, dhakhtarada tababarka ku jira, kaaliyaasha dhakhtarka, iyo shaqaalaha bulshada ee caafimaadka ee ruqsadda leh). Carruurta diiwaan gashan ayaa xulan kara in GPH noqoto xaruntooda caafimaadka ee aasaasiga ah, taas oo siinaysa daryeelka isku xiran ee la heli kar sanadka oo dhan. Haddii ilmuhu haysto daryeelka aasaasiga ah oo uu meel kale ka helo, dhakhaatiirta SBHC ayaa kala shaqeyn doona daryeelka dhakhtarka guud ee ilmaha.

**Su'aal: Waa maxay adeegyada lagu baxsho SBHC?**
**Jawaab:** Adeegyada la baxsho waxaa kamid ah: baaritaanka jirka ciyaaraha, baaritaanka iyo daawaynta xanuunnada dabo dheeraada, talaallada, tallo bixinta caafimaadka dhimirka, qaadista dhiiga (dhiiga lagu qaado shaybaarada) iyo maareynta kahortaga uurka.

**Su'aal: Daruuri ma tahay in ilmuhu u tagaan kalkaalisada dugsiga marka koobaad ama waa inay toos u aadaan SBHC?**
**Jawaab:** Ilmaha ka diiwaan gashan adeegyada caafimaadka ee dugsiga ayaa dooran kara meesha ay marka koobaad aadayaan. Ilmaha diiwaan gashan ayaa markasta lagu soo dhawaynayaa inuu yimaado xarunta SBHC inta lagu jiro saacadaha shaqada. Balamaha ayaa la qabsan karaa xili hore ayadoo loo maraayo kalkaalisada dugsiga ama ilmaha ayaa qabsan kara.

**Su'aasha: Ilmahayga ma lagu qaabili karaa SBCH xataa haddii uusan xaadirin dugsigaas?**
**Jawaab:** Haa, haddii ilmahaagu ka diiwaan gashan yahay adeegyada caafimaadka ee dugsiga ee GPH, waxaa lagu qaabili karaa midkood xarumaheena SBHC-yada iyo adeegga daryeelka aasaasiga ah ee GPH oo u adeegga carruurta.

**Su'aal: Ma u baahan nahay in aan ilmahayga dib uga diiwaan galsho adeegyada caafimaadka dugsiga ee GPH sanad kasta? Haddii ilmahaygu iskaga baxo dugsiyada Westbrook, South Portland ama Portland, wali ma ahaanayaa bukaanka GPH?**
**Jawaab:** Marba haddii ilmahaagu yahay arday dhigta Dugsiyada Dawlada ee Westbrook, South Portland ama Portland, UMA baahnid in aad soo gudbiso dukumiinti cusub sanad kasta. Sidoo kale uma baahnid in aad soo gudbiso dukumiinti dheeraad ah si ilmahaaga loogu qaabilo xarun kamid ah xarumaheena GPH SBHC-yada ama adeeg kasta oo aasaasi ah oo ay bixiso GPH oo u adeegga carruurta.

Haddii ilmahaagu uusan hadda kadib dhigan midkood sadexaadna nidaamyada dugsiga, waa in aad la xiriirtaa GPH adoo wacaaya 874-2141 aadna ka codsato in ilmahaagu sii ahaado macmiilka midkood adeegyadeenaan daryeelka aasaasiga ah oo u adeegga carruurta. Dukumiinti dheeraad ah ayaa loo baahan karaa.

**Su'aal: Ka waran haddii ilmahaygu u baahdo daryeelka caafimaadka saacadaha ka baxsan kuwa dugsigu furan yahay?**
**Jawaab:** Waxaad balan ka qabsan kartaa adeeg kasta oo daryeelka aasaasiga ah oo ay bixiso GPH adoo ka wacaaya 874-2141. Haddii ilmahaagu haysto dhakhtarka guud oo ka baxsan GPH, waad la xiriiri kartaa asagana.

**Su'aal: Ilmahaygu ma awoodi doonaa in uu helo bixiyaasha SBHC inta lagu jiro muddooyinka waxbarashada oonlaynka ah ama jadwallada dugsiga ee wax laga badelay?**
**Jawaab:** Haa. Dhammaan bixiyaasha caafimaadka iyo daryeelka dhimirka ayaa awooda inay qabtaan balamaha caafimaadka ee oonlaynka ah (aalada ZOOM ama taleefanka) oo loo qabto bukaannada. Si aan u haysano xogta xiriirka saxda ah ee booqashooyinka caafimaadka khadka, fadlan nagu sii ciwaanka iimeylka ilmahaaga foomka diiwaan gelinta.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir taleefanka (207) 874-2141 X 8402 ama iimayl ahaan cinwaanka gphschoolhealth@greaterportlandhealth.org